



Barnaamijka gobolku waxa uu siiyaa qoysaska caawimo ay iska bixiyaan kharashka cuntada

Inta ay bulshadeenu la tacaalayso fiditaanka cudurka faafa ee Coronavirus, waxa aanu doonaynaa in aanu ku baraarujino qoysaska Dugsiyada Dadweynaha ee Portland faa'iidada gobolka ee caawimada bixinta kharashka cuntada. Barnaamijka xawilaada dheefta elektarooniga ah ee caalamiga ah, ama P-EBT, waxa la heli karaa si looga caawiyo qoysaska sidii uu ugu soo noqon lahaa kharashkii cuntooyinka lagu isticmaali lahaa dugsiga. Waxa maamulaysa waaxda Oregon ee Adeegyada Aadanaha.

Faa'iidada P-EBT waa mid ay heli karaan qoysaska ardaygoda laga daayey ama laga dhimay kharashkii cuntada iyo arday kasta oo ka diiwaan gashan [dugsiga Community Eligibility Provision \(CEP\)](#). Qoysaskaasi:

- Qoysaska u qalma Barnaamijka Jimciyadda Nafaqada Dheeriga ah (SNAP), taas oo siisa faa'iidooyin cunto qoysaska iyo ashkhaasta dakhliga yar ee loo ogol yahay, waxa ay heli doonaan faa'iidooyin si toos ah loogu shubi doono akoonadoodii hore u jirey ee EBT. Ma jiraan wax waraaqo dheeri ah oo la soo gudbin doono si loo qaato faa'iidooyinka P-EBT.
- Qoysaska imiki ahaan loo ogol yahay cuntooyin kharashkooda la dhaafay ama la jabiyey ama xadira dugsi CEP ah waxa ay ka heli doonaan Oregon Trail Card boosta dhexdeeda iyada oo ay la socoto tilmaamaha sida looga shaqaysiiyo ama loo diido faa'iidooyinka. Ma jiraan wax waraaqo ah oo dheeraad ah oo la soo gudbin doono si loo qaato faa'iidooyinka P-EBT.

Qoysaska aan imika ahaan loo ogolayn bal se raadinaya faa'iidooyinka:

- Reeraha uu dhaqaale ahaan saameeyey COVID-19 waxa laga yaabaa in ay u qalmaan SNAP. Eeg [websaytka barnaamijka](#) si aad u sii ogaato wax badan.
- Reeraha la kulmay khasaare dakhli waxa laga yaabaa in ay imika in loo ogolaado cuntooyin kharashkooda la dhaafay ama la jabiyey. Online ku apply garee www.pps.net/nutrition.

Wixii caawimo ah ee la xidhiidha xaraynta dalabka cuntada, fadlan la xidhiidh Xafiiska Faa'iidooyinka Cuntada ee PPS: mealbenefits@pps.net or 503-916-3402.

Wixii su'aalo ah ee la xidhiidha EBT-ga caalamiga ah, fadlan la xidhiidh [Waaxda Oregon ee Adeegyada Aadanaha](#).